# Qoraal loogu talagalay Soo-jeedinta ama Soo-bandhigga Waddada Baaskiilka ee Beacon Hill

## 1. Kulanka Dul-dhacyada ah ee Waddada Baskiilka ee Beacon Hill ee loogu talagalay Qaybaha 2aad iyo 3aad

Waan idin salaamay, waad ku mahadsan tihiin daawashada soo-jeedinta ama soo-bandhigyada Waddada Baaskiilka ee Beacon Hill ee loogu talagalay Qaybaha 2aad iyo 3aad. Waxaan soo-jeedintan ku bilaabi doonnaa aqoonsasho dhuleed.

Waxaannu aqoonsanahay dadkii asal ahaan degganaa meeshan, qabiillada Coast Salish iyo Duwamish, oo tan iyo waa hore ka ugaarsan jiray, ka kalluumeysan jiray, miro ka uruursan jiray, soona daryeelay dhulalkan. Waxaan ixtiraamaynaa madax-bannaanidooda, xaqa ay u leeyihiin in ay aayahooda ka tashadaan, waxaanna maamuusnay xiriirka ruuxiga ah ee xurmada leh ee ay la leeyihiin dhulka iyo biyaha.

## 2. Guudmarka Soo-jeedinta

Soo-jeedinta maanta waxaa soo-jeedin doonna aniga nafteyda, Lisa Harrison, oo ah hoggaanka war-isgaarsiinta iyo gaarista/wacyi-gelinta, iyo Serena Lehman, oo ah horumariyaha mashruuca ayaa guudmar kooban ka bixin doonna mashruuca waxaanna muujin doonnaa tusaalooyin waxaanna ka munaaqashi doonnaa sida mashruuca u qorsheynayo in uu horey ugu socdo iyo jawaabcelinta aynu jeclaan lahayn in aynu adiga kaa helno.

## 3. Himiladeenna, hiigsiga iyo qiyamka muhiimka ah

Haddaanu nahay Waaxda Gaadiidka ee Seattle (SDOT) waxaannu doonaynaa in aynu bixinno mashaariic wax ku biirriya bulshada kobcaysa, sinnaanta ka jirta oo leh gaadiid la isku halleyn karo.

Waxaan doonaynaa nidaamka gaadiidka in uu dadka siiyo gaarista amaanka ah ee la awoodi karo ee goobaha iyo fursadaha, waxaa innagu haga sameynta sidan qiyamkeenna sinnaanta, bedqabka, dhaqdhaqaaqa, joogteynta, ku habboonaanta in lagu noolaado, iyo heerka sare. Waxaan hadda soo-jeedinta ku wareejin doonnaa Serena.

## 4. Hadafka Mashruuca

Sannadkii 2019, Waaxda Gaadiidka ee Seattle (SDOT) ayaa waxay wacyi-gelin/gaarid ka sameysay guud ahaan Magaalada si ay u oggaato haddii bulshadu ay mudnaan u leedahay in ay helaan meelo ay baaskiil ku wataan. Waxaan si cad u maqalnay in ay muhiim tahay in la helo waddooyin badan oo mara Koonfur-bari ee magaalada Seattle si ay dadku ugu xiraan xaafadda iyo xarumaha shaqada, gaar ahaan waddada Beacon Hill. Mashruuca Waddada Baaskiillada ee

Beacon Hill (Beacon Hill Bike Route Project) ayaa la abuuray iyada oo wax laga qabanaya waxa aynu maqalnay. Hadafka mashruucan laga leeyahay waa in la abuuro waddo baaskiil mara amaan ah oo raaxo leh taasi oo dadka ku xiriirrisa ganacsiyada iyo meelaha ay bulshadu tagto ee ku yaalla Beacon Hill.

Mashruucan baaskiillada ayaa sii wadaya dhisidda shabako baskiil oo ku xiran jidadka baaskiillada mara ee cusub ee ku yaalla waddooyinka S Columbian Way, S Myrtle St, iyo Chief Sealth Trail.

## 5. Baahiyada Mashruuca

Waxaan qorsheynaynaa waddo baaskiillada ay maraan oo ku taalla Beacon Hill maadaama aynu goobta u aqoonsanay in ay tahay marin mudnaan-sare u leh daboolidda baahiyadan gaadiidka iyo kuwan bulshada ee soo socda:

- Mashruucan wuxuu wax ku biirrinayaa yoolka Himilada Eber ee Magaalada (City’s Vision Zero) si loo joojiyo dhimashada iyo dhaawacyada culus ee ka dhasha shilalka gaadiidka.
- In la bixiyo isku-xirka waddooyinka baaskiillada ee waqooyi/koonfur oo wanaagsan oo ka jira koonfurta-bari ee magaalada Seattle.
- Sii wanaajinta bedqabka dadka lugeynaya iyo kuwa baaskiillada ku socda iyo isku-xirrada gaadiidka magaalada u kala-goosha.

In kasta oo ay jiraan waddooyin kale oo ay baaskiilladu maraan oo dhow, waddooyin kale kuma xirmaan isla meelaha muhiimka ah ee ay bulshadu tagto.

## 6. Qaybaha Ugu Muhiimsan Mashruuca

Haddaba aynu u guda galno guudmarka mashruuca. Iyada oo sabab u ah in Beacon Hill ay tahay mid aad u dheer ayaa goob walba waxay leedahay baahiyo iyada u gaar ah waanna wax aynu ku qiimeynayno mashruuca, waxaannu mashruuca u qaybinaynaa saddex qaybood oo dhaca waddada Beacon Ave S. Qaybta 1aad waxay ka soo bilaabanaysaa buunddada Dr. Jose Rizal Bridge waxayna gaareysaa ilaa wadda S Spokane St waxayna ku xirmaysaa xaafadda Waqooyiga Beacon Hill. Qaybta 2aad waxay ku taallaa waddada Beacon Ave S laga soo bilaabo waddada S Spokane St ilaa waddada S Myrtle St. Waxay aadaysaa beerta Jefferson Park waxayna ku xirmaysaa jidka dhexe ee mara bartamaha Beacon Hill. Ugu dambeyn, Qaybta 3aad ayaa u dhaxeyn doonta Waddada S Myrtle St iyo Waddada S 39th St ee koonfurta Beacon Hill. Goobtan ayaa inta badan ah degaan la deggan yahay. Waxaannu qiimeyn doonnaa sidii loo horumarin lahaa jidka bartamaha dhexe mara si looga dhigo mid qof walba uu u bogo ama jeclaado.

## 7. Degaanka mashruuca

Halkan si dhow uga eeg degaanka mashruuca. Waxaannu khariiraddan ku calaamadeynay qaar ka mid ah meelaha ugu muhiimsan bulshada, sida Daarta Pacific Tower, Hilltop Red Apple,

maktabadda, iyo meelo kale. Hadda la joogo, waxaan ku guda jirnaa marxaladda qorsheynta ee dhammaan saddexda qaybood ee mashruucan. Labadaba Qaybta 2aad, laga bilaabo Waddada S Spokane St ilaa Waddada S Myrtle St, iyo Qaybta 3aad, laga bilaabo Waddada S Myrtle St ilaa Waddada 39th St S, waa waxa aan kaga hadli doonno soo-jeedintan.

## 8. Guudmarka waddada baaskiilka

Ka hor inta aan u guda gelin tusaalooyinka, ayaa waxaan jeclaan lahaa in aan ka hadlo sida uu u ekaan karo mashruuca baaskiilka. Marka xarunta baaskiilku ay ku taallo waddo ay baabuurtana maraan, waxaannu qorsheynaynaa in aannu sameyno waddo ay baaskiillada maraan oo dhowrsan ama ilaalsan. Tani waxay leedahay meel cayiman oo loogu talagalay in ay dadku ku wataan baaskiiladooda iyo nooc difaac taagan ama gidaar ahaan ah oo loo dhaxeysiinayo dadka baaskiilada wata iyo baabuurta. Jidka mara bartamaha dhexe, ayaa waxaan wadnaa baaritaan ah in aynu dayactirno oo aan ballaarino jidka si uu ugu habboonaado dadka baaskiillada wata iyo kuwa lugeynaya, oo asal ahaan ka dhigaya jid adeegsi badan leh.

## 9. Xaaladaha jira

Waxaan hadda eegi doonnaa xaaladaha jira. Sawirkan, ayaa waxaan ku eegaynaa waddada Beacon Ave S inta u dhaxeysa waddada S Spokane St iyo waddada S Alaska St. Waxaa jira laba wadiiqo ama dhabbe oo lagu socdo iyo mid dhexe mara oo loogu talagalay in lagu leexdo marka la leexanayo. Qaybtan fidsan ee waddada Beacon Ave S ayaa waxay u dhaxeysaa garoonka ciyaarta xeegada(golf) lagu dheelo, beerta Jefferson Park, iyo Cusbitaalka Arrimaha Ciidanka Hawlgabka ah. Waddada 36aad ayaa halkan marta. Waxaa sidoo kale jira meel xigtaoo ay baabuurta dhigtaan dadka adeegsada beerta iyo xarunta bulshada.

U socota koonfur laga bilaabo waddada S Ferdinand St waxayna soconaysaa ilaa S 39th St, waxaa waddada labadeeda dhinac ku yeella meelo baabuurta la dhigto, dhabbe u socda jiho kasta, iyo mid mara bartamaha dhexe. Waddada 36aad ayaa sii wadeysa in ay ka hawlgasho degaankan.

## 10. Nakh-shadda La Soo-jeediyay

Hadda waxaan ka hadli doonnaa tusaalooyinka aynu soo-jeedinay. Inta u dhaxeysa waddooyinka S Spokane St iyo S Alaska St, ayaa waxaan soo-jeedinaynaa in aynu meesha ka saarno dhabbaha bartamaha dhexe mara ee lagu leexdo iyo in aan labada dhinac ee waddada ka sameyno dhabbeyaal ay baaskiilladu maraan oo ilaalsan ama dhowrsan.

## 11. Wax-ka-beddelka boosteejada baska ee suuragal ah

Marka la maro qaybtan waddada Beacon Ave S, ayaa waxaa ku yaalla boosteejooyinka basaska oo dhowr ah oo kala duwan. Halkan waxaa ka muuqda qaar ka mid ah tusaalooyinka waxaa sida suuragalka ah aynu ka sameyn karnaa boosteejooyinka basaska si aynu u yareyno is-diidanaanta u dhaxeysa baska iyo baaskiilka. Dhanka bidix, ayaa waxaa ku yaalla jasiirad ama

cad dhul ah oo ay basasku istaagaan dhanka midigna waxaa ku taalla boosteejada baska oo ay basasku dhabbaha istaagaan. Halkan waa halka dhabbaha baaskiilka kor loogu qaadayo boosteejada baska si ay ugu habboonaato dadka baska fuulaya.

## 12. Nakh-shadda la soo-jeediyay

Marka aan dhanka koonfureed u sii dhaqaaqno, oo ay jidadka bartamaha dhexe mara ay bilowdaan, ayaa waxaan inta badan eegaynaa in aan ballaarino jidka iyo in aan dayactirka iyo hagaajin ku sameyno goobta si aan waayo-aragnimo wanaagsan u siinno dadka lugeynaya iyo kuwa baaskiillada ku socda.

## 13. Dhabbaha Bartamaha Dhexe

Kuwan waa sawirrada xaaladaha ka jira dhabbaha bartamaha dhexe ee jidka mara. Sida aad arki kartaba, maanta waxaa hadda la jooga adeegsada dadka baaskiillada wata iyo kuwa lugeynaya. Waxaa jira laba waxyaabood oo aynu kala kulannay dhabbaha bartamaha dhexe ee jidka mara intii aan qorsheynaynay mashruucan baaskiilka ee aynu qiimeynayno: meelo baabuurta la dhigto iyo meelo wadooyinka laga gooyo.

## 14. Meel baabuurta la dhigto oo bartamaha dhexe ee jika ah

Waxaa jira dhowr meelood oo baabuurta la dhigto kuna yaalla bartamaha dhexe ee waddada saddexda meelood ee ugu waaweynna waa jidadka S Columbian Way, S Graham St, iyo S Myrtle St. Sahankeenna, ayaa waxaan dooneynaa in aynu ku oggaano haddii aad adeegsato meelahan, ujeeddada aad u adeegsato, iyo inta jeer ee aad adeegsato. Waxaa intaa dheer, in aynu la xiriirayno ganacsiyada si aan u fahanno in meelahaasi loo adeegsado ganacsiyadaasi.

## 15. Meelaha ay Baabuurta ka Gooyaan ee Bartamaha Dhexe ee Jidka ah

Sawirkan, waxaa ku yaalla dhowr meelood oo bartamaha dhexe ee waddada ah oo laga gooyo. Si loo sii wanaajiyo bedqabka dadka ku lugeynaya iyo kuwa baaskiilka ku wata bartamaha dhexe, ayaa waxaan qiimeynaynaa xiridda dhowr meelood oo ka mid ah meelahan laga gooyo. Tani waa khariiradda meelaha ay baabuurta ka gooyaan waddada ee aynu soo-jeedinayno in la xiro. Soo-jeedinteenna, ayaa waxaa ku xusan masaafada ugu badan in ay noqon doonto in ka yar 0.2 mayl oo u dhaxeeya furitaannada. Gaaristeenna, waxaan doonnaynaa in aannu ku oggaano haddii aad adeegsato meelahan laga galo iyo ujeeddada aad u adeegsato. Hadda, waxaan ku wareejin doonnaa Lisa.

## 16. Dadaalada kale ee ay wado magaalada Seattle ee ka socda degaankaaga

Mahadsanid, Serena. Waxaan ku dhownahay in aynu soo gebogebayno soo-jeedinteenna, balse marka hore, waxaan jeclaan lahaa in aan hubsado haddii aad ka warqabtaan laba mashruuc oo agagaarkan ka socda.

Kan koowaad waa mashruuca Sii Wanaajinta Jidka 15th Ave S, kaas oo dhismahiisa la bilaabayo horaanta sannadka 2021. Mid kasta oo ka mid ah cunsurrada ama waxyaabaha ku jira mashruucan ayaa loogu talagalay in ay wax-ku-biirriyaan faa'iidooyinka dadweynaha ee marinkan. Laga bilaabo malaasidda ama laami saaridda waddada ilaa isbeddelada lagu sameynayo isgoyska, waxaan filaynaa in aan goobtan ka dhigto mid ay ku bedqabaan intaba dadka lugeynaya, ku socda kabaha ama looxa taraaraxa, ku socda baaskiillada iyo kuwa baabuurta wata. Wax badan ka ogow adiga oo booqanaya mareegtada mashruuca.

Kan kale waa mashruuca Jaran-jarada Jidka S Henderson, kaas oo hadda maraya marxaladda nakh-shadeynta iyada oo dhismuhu bilaaban doonna sannadka 2021 gudahiisa. Jaran-jarada cusubi waxay kordhin doontaa gaaridda/gelidda habboon ee boosteejada Sound Transit Rainier Beach iyo adeegyada kale ee bulshada ee loogu talagalay ardayda iyo dadka deggan Koonfurta Beacon Hill. Wax badan ka ogow adiga oo booqanaya mareegtada mashruuca.

## 17. Tallaabooyinka Xiga

Waxaan haynaa sahan barta internet-ka lagu sameynayo oo loo heli karo Qaybaha 2aad iyo 3aad ee degaanka mashruuca ee aan jeclaan lahayn in aan ku helno jawaabcelintaada iyo taageeradaada. Fadlan booqo mareegtada mashruuca si aad u hesho linki-ga ama xiriirka sahanka. Sahanka wuxuu furnaan doonnaa ilaa maalinta Arbacada, 18ka Nofembar. Waxaan qabanaynaa kulan dul-dhac ah maalinta Khamiista, 12ka Nofembar. Waxaan ku wadaagi doonnaa macluumaad ku saabsan mashruuca waxaanna qaban doonnaa kulan Su'aal iyo Jawaab oo toos ah.

Waxaan ka shaqeyn doonnaa in aan kula soo xiriirno guud ahaan inta uu socdo masharuucan.

Waxaad la socon kartaa waxqabadyada gaarista ee soo socda adiga oo eegaya mareegtada mashruuca ama rukumannaya wararka cusub ee lagu soo diro iimaylka.

## 18. Waad ku mahadsan tahay daawashada soo-jeedintan

Xusuusnow, in uu jiro kulan dul-dhacyo ah oo barta internet-ka lagu qaban doonno maalinta Khamiista, 12-ka Nofembar laga bilaabo 6 ilaa 7:30 fiidnimo (pm). Sahanka barta internet-ka lagu sameynayo waa mid hadda toos u socda waxaanna linki-ga ama xiriirka laga heli karaa mareegtada mashruuca.

Sahanka wuxuu furan yahay ilaa maalinta Arbacda, 18-ka Nofembar. Waad ku mahadsan tahay daawashada soo-jeedintan.